

MEELEYNTA FASALKA 7 EE SANNADKA DANBE
PLACEMENT IN YEAR 7 NEXT YEAR

Magaca ardeyga:

Sannad taariikheedka meeleynta ee Year 7:

Taariikhda soo celinta Codsiga isqorida:

Taleefanka dugsiga haddii aad u baahan tahay caawimaad:

Gacaliye Waalid/Xannaaneeye

Waad ku mahadsan tahay danaynta meeleynta ilmahaaga, magaciisu ka muuqdo kor, Year 7 ee dugsigan.

Iyadoo loo eegayo danayntaada, waxaan u helnay ilmahaaga boos liiska isqoritaanka ee sannadka danbe. Sidaad ka warqabi doontid, ilaa codsi dhameystiran oo isqoritaan uu dugsigu aqballo, lama dhameystiri karo qoritaanka ilmahaaga.

Haddii aad dooneysid inaad sii wado isdiiwaangelinta codsiga ee tooska ah, fadlan ku buuxi Ingiriis codsiga ku lifaaqan si aad isaga qortid dugsiga dawlada ee NSW (*Application to enrol in a NSW government school*) iguna soo celi foomkan aniga taariikhda kor ku qoran.

Waxaad ogaaneysaa in foomkan haddaba leeyahay qaybo badan oo lagu buuxiyey. Kani waa macluumaad ku saabsan ilmahaaga oo aan haddaba ku heyno nidaamkayaga kumbiyuutarkaga. .

1. Fadlan jeegaree dhammaan macluumaadka daabacan sameena wixii sixitaan ah ee loo baahan yahay.
2. Fadlan buuxi dhammaan macluumaadka maqan.
3. Fadlan hubi inaad ka jawaabto dhammaan su'aalaha lagama maarmaanka ah oo saxiix foomka.

Fadlan ogow:

- Waa khasab inaad ka jawaabto dhammaan su'aalaha ku yaal foomka codsiga marka laga reebo kuwa ku saabsan waxbarashadaada iyo shaqadaada.
- Haddii aanan helin codsigaaga isqorida taariikhda kor ka muuqata waxaan u qaadaneynaa in aadan xiiseynaynin waxaana loogu yeerayaa ardey kale si ay u soo codsadaan.
- Haddii aad soo gudbisid codsigan laakiinse ka dib aad isbedesho, ama xaaladahaagu isbedelaan oo aadan dooneynin inaad isqorida sii wado, fadlan ula soo xirriir dugsiga sida ugu dhakhsaha badan si aanu ula xirriirno ardeyda kale ee liiska sugitaanka ku jirta.

Codsigaaga dib ayaa loo eegayaa waana laga shaqeynayaa si mudnaan leh. Haddii la aqballo, waxaa lagu soo dirayaa caddeyn rasmi ah oo isqoritaan. Xaaladaha qaarkood waxaa laga yaabaa inaan wax kaa soo weydiino qaar ka mid ah macluumaadka aad ku soo qortay codsigaaga. Haddii ay sidaan tahay xaaladu, waan kula soo xirriiri doonaa.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad buuxinta foomka *Application to enrol in a NSW government school* fadlan la xirriir dugsigaaga hoose dhexe ee xaafada, ama taleefan noo soo dir si aad ballan u sameysato si aad u la hadasho mid ka mid ah shaqaalahayaga dugsiga sare. Haddii aad u baahan tahay turjubaan ku caawiya waxaad wici kartaa Adeega Taleefanka Turjubaanka lambarkan 131 450 oo aad weydiisan karto turjubaan afkaaga ah. Turjubaanka ayaa wici doona dugsiga kuna jiri doona khadka si uu kaaga caawiyo wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Waad ku mahadsan tahay caawintaada.

Mahadsanid

Maamulaha
Principal